

Guddiga Maamul Wanaagga Maaliyadda: Hadalqoraalka kulanka oo kooban

Kulanka 58aad ee 20ka Febraayo 2023 – Wasaaradda Maaliyadda

Dib-u-habeynta Maaliyadda iyo Miisaaniyadda: Wasiirka Maaliyadda iyo Guddoomiyaha Bangiga Dhexe ayaa ka warbixiyay qorshaha Dowladda Federaalka ee kabidda hantidda keydka ee Bankiga Dhexe. Waxaa la filayaa in qoondo loogu sameeyo miisaaniyadda dheeriga ah ee 2023. Kulankan ayaa sidoo kale looga hadlay magacaabistii hanti-dhowraha qaranka ee cusub iyo xaalada hindise sharciyeedka heyadda hanti dhowrka.

Arrimaha Batroolka iyo Gaaska: Ergooyinka ka socda Beesha Caalamka ee ka mid ah Guddiga ayaa soo bandhigay dib-u-eegis ku saabsan heshiisyada wax soo saarka wadaagga saliidda (PSAs) oo ay horay u kale saxeexdeen Dowladda Federaalka iyo shirkadda Coastline. Dib-u-eegista ayaa qiimeeysay heerka ay heshiisyadaasi la jaan qaadayaan tusaha wax soo saar wadaagaa oo uu horay u ansixiyay guddiga qandaraasyada ee heer wasiir (IMCC) iyo sharciyada dalka Soomaaliya. Kulanku wuxuu isku raacay in lala wadaago natiijada qiimeyntani hoggaanka sare ee Dowladda Federaalka.

Heshiiyada iyo Qandaraasyada Guud: Agaasimaha guud ee Wasaaradda Kalluumeysiga ayaa kaga warbixiyay guddiga Maamul Wanaagga Maaliyadda is afgaradka bixinta shatiga kalluumeysiga ee ay kala saxeexdeen Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Shirkadda China Beijing Chaoyang Holding. Wasaaraddu waxay hadda ku howlan tahay kormeeka maraakiibta kalluumeysiga ee la siin doono shatiga si loo hubiyo inay leeyihiin oo ay u hoggaansamaan heerka tayada ku xusan sharciga kalluumeysiga ka hor inta aan la siin shatiga kalluumeysiga ee tuunaha. Dakhliga laga helo ruqsadda shati bixintaan waxaa wadaagi doona Dowladda Federaalka iyo dowladaha xubinta ka ah Federaalka si waafaqsan heshiiska wadaaga dakhliga ee 2019, kaasoo hada la kordhiyay illaa Oktoobar 2023.

Ku-simaha Agaasimaha Guud ee Heyadda Tayo Dhowrka Soomaaliyeed ayaa uga warbixiyay kulanka adeega tartanka furan ee tayo dhowrka waxyaabaha la soo dhoofiyo, kaas oo la

xayaysiiyay. Waxaa sidoo kale horumar lagu sameeyaa diyaarinta tartanka furan ee adeega hubinta tayada waxyaabaha dalka laga dhoofiyo. Guddiga Maamul Wanaaga Maaliyadda waxuu sii waddaa ka gacan siinta Heyadda sidii ay u heli lahayd talada khabiir ka taageera geedi socodka diyaarinta iyo habka qiimeynta tartamada furan.

Kulanka waxaa sidoo kale looga warbixiyay geedi socodka qandaraaska raashinka iyo saadka heyadaha kala duwan ee amniga, kaas oo si guul leh loo dhammeystiray.

Sidoo kale waxaa kulanka looga hadlay talo soo jeedinta Guddiga Maamulka Wanaaga ee ku saabsan qaab-dhismeedka hay'adeed ee Iskaashiga dowladda iyo Shirkadaha Gaarka loo leeyahay. Talada guddiga ayaa lagu sheegay in habdhismeedka hey'adeed ee hadda ku dhisan tahay waaxda iibka iyo qandaraasyada ay la jaan qaadayaan hababka caalamiga ah ee wanaagsan. Kulanku wuxuu hoosta ka xariiqay in Sharciga Iibka Qaranka uu waajibiyay in la dhiso guddi farsamo ka shaqeeya arrimaha qandaraasyada oo hoos yimaada Wasaaradda Maaliyadda si uu u taageero shaqada IMCC. Waxaa la isku raacay inta laga aasaasayo guddigaasi farsamo, waxaa howsha sii qaban doona Agaasinka Waaxda Iibka.